IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

Sannadka 13aad 1da Oktoobar 1985 L. 10

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

الجمهورية الصومال الديمقراطية

[illegible] جريدة شهرية

**QIIMADU**: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Saddii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N


QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 19 ee 30 Sebt. 1985. Dhismaha Mashruuca Horumarinta Bombeemada Bog; 709

SHARCI L. 20 ee 30 Sebt. 1985, Isbeddelka 1aad ee Miisaaniyadda 1985.— » 719

QAYBTA LABAAD

XEER

W. M.

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM

MAXKAMADDA DEGMADA BERBERA, 27.7.85, Lumid 2ba Jeeg War. ku qoran Maxamed Cabdulqaadir Xamuud 721

MAXKAMADDA G. KISIMAAYO, 10.6.81, Lumid Jeeg. War. ku qoran Cabdirax-

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI Lambar 19 taariikh [illegible] Sebt 1985 Dhismaha Mashruuca Horumarinta Bombeelmada.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga

WUXUU SOO SAARAYAA: Sharciga Soo socda.—

QAYBTA KOOWAAD

AXKAAM GUUD

Qodobka 1aad

Abuuridda Mashruuca

1. Waxaa la dhisay Mashruuca Horumarinta Bombeelmada (grapefruit Development Project) waxaana hadda kaddib lagu magacaabi doonaa Mashruuca.

2. Mashruuca wuxuuna yeelanayaa maamul madax banaan, Jiritaan iyo shakhsiyad sharci ah.

3. Mashruucu wuxuu hoos yimaadaa W. Beeraha.

Qodobka 2aad

Xarunta Mashruuca

Xarunta Mashruuca waa Golweyn, wuxuuna laamo ku leeyahay Muqdisho iyo Jennaale, Mashruucu wuxuu Awood u leeyahay in uu Degmooyinka oo idil uu ka furto laamo oo uu leeyahay.—

Qodobka 3aad

Saldhigga Mashruuca

Mashruucu wuxuu u hoggaaminayaa sharciyada iyo Xeerarka nidaamiya maaliyadda, Xisaabaadka iyo Shaqaalaha Wakaaladda madax bannaan ee Qaranka, gaar ahaanna kuwa soo socda:

a) Xeerka lambar 16 ee 12ka Abriile 1970kii ee ku saabsan Wakaaladda madax banaan.

b) Xeerka lambar 58 ee 13kii Luulyo 1972kii ee [illegible] Wakaaladaha Madax bannaan.—

t) Xeerka lambar 36 ee 22kii Abriile 1972kii ee Sha qaalaha Wakaaladda.

Qodobka 4aad

Meeleynta Mashruuca

Mashruuca waxaa lagu meeleeyey darajada (B).

Qodobka 5aad

Ujeeddooyinka Mashruuca

Ujeeddooyinka Mashruucu waa kuwa soo socda:

1. Kordhinta iyo fududeynta helitaanka noocyo wanaagsan oo bombeelmo ah iyo nooc kasta oo geed mirood ah, isagoo kaalmo joogto ah u fidinaaya xarunta abuur badinta Jenaale;

2. Abuurista xubin fidineed (servizio propoganda) oo gacan iyo kaalmo u fidisa dadweynaha tacbado bombeelmada, si loo horumariyo teknolojiyada wax soo saarka, loo xoojiyo la dagaalanka cayayaanka iyo cudurrada, loona suurtageliyo u gudbinta beeraleyda qalabka iyo alaabta kale oo ay u baahan yihiin;

3. U fidinta kaalmo joogto ah beerta Golweyn iyo dhammeystirka hawlaha dhismaha iyo maalgelinta kharajka wax soo saarka (operation costs) ilaa geeduhu ay gaaraan heer miro goosasho (shanta sano ee dambe).

Qod. 6aad

(Awoodda Mashruuca)

Mashruucu wuxuu awood u leeyahay inuu qaado tallaabo kasta oo Sharciga waafaqsan, laguna xaqiijinaayo himilooyinka ku tilmaaman qodobka hore.

Qod 7aad

(Ilaalin guud)

1. Wasiirka Beeruhu wuxuu Mashruuca ku leeyahay awood ilaalin guud iyo toosin.

2. Wuxuu kaloo ku leeyahay awoodaha gaar ahaaneed ee ku tilmaaman Sharcigan.

# QAYBTA LABAAD

## QAABKA MAAMULKA

### Qod. 8aad

(Xubnaha Mashruuca)

— Guddi maamul;
— Guddoomiye;
— Maareeye Guud iyo
— Maareeyayaal waaxeed.

### Qod 9aad

(Guddiga Maamulka)

1. Guddiga Maamulka waxa uu ka kooban yahay Guddoomiyaha, Maareeyaha Guud iyo min hal xubin oo darajadoodu aaney ka yareyn Agaasime Waax oo masila Wasaaradda Maaliyadda, Wasaaradda Qorsheynta Qaranka iyo Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

2. Xubnaha kor ku tilmaaman waxaa lagu magacaabayaa Xeer Madaxweyne, iyadoo la dhegeystay soojeedinta Wasaaradda ku shaqada leh.

### Qod 10aad

(Fadhiyada Guddiga Maamulka)

1. Guddiga Maamulku wuxuu kulmayaa saddexdii biloodba mar iyo marka ay timaaddo baahida ku tilmaaman Qod. 19aad.

2. Waxaa isugu yeeraya Guddoomiyaha 15 maalmood ka hor fadhiga. isagoo warqadda isugu yeeridda shirka ugu lifaaqaya ajendaha Shirka.

3. Guddiga Maamulku wuxuu isugu iman karaa fadhi aan caadi ahayn waxaana isugu yeeri kara, marka ay jirto baahi weyn, Wasiirka Beeraha ama Guddoomiyaha. Waxaa kaloo la isugu yeeri karaa marka ay codsadaan Saddex ka mid ah Xubnaha Guddiga.

4. Fadhiga Guddiga Maamulku waxa uu ku ansaxayaa marka ay ka soo qayb galaan aqlabiyadda Xubnaha. go'aannadana waxaa lagu guddoonsanayaa cod hal dheeri ah.

Qod 11aad

(Hawlaha Guddiga Maamulka)

Guddiga Maamulku waxa uu qabtaa hawlaha soo socda:

a) Oggolaanshaha qorshe sannadeedka hawigalka Mashruuca iyo wax ka beddel ddiisa;

b) Qiimeynta hawlgalka Mashruuca iyo heerka fulinta qorshe waqtiyeedkiisa;

t) Dersidda iyo go'aan ka gaaridda arrimaha la soo gudboonaada Mashruuca ee ka baxsan awoodda Guddoomiyaha iyo Maareeyaha Guud;

j) Oggolaanshaha miisaaniyadda ku-talo-galka, wax ka beddeliddeeda iyo midda xisaabxirka;

x) Oggolaanshaha kharajyada Mashruuca ee qiimahoodu ka badan yahay Shs. 500.000/=;

kh) Oggolaanshaha deymanka Mashruucu u baahdo gudaha ama dibeddaba;

d) Oggolaanshaha qoridda, dallacaadda, mushaarka iyo gunnooyinka Shaqaalaha iyo shaqo ka fariisintooda.

Qod. 12aad

(Guddoomiyaha Guddiga Maamulka)

1. Guddoomiyaha Guddiga Maamulka waxaa lagu magacaabayaa Xeer Madaxweyne iyadoo la dhegeystay soojeedinta Wasiirka Beeraha.

2. Guddoomiyaha Guddiga Maamulku wuxuu qabanayaa hawlaha soo socda:

a) Isugu yeeridda fadhiyada Guddiga Maamulka ee caadiga iyo kuwa caadiga ahaynba, isagoo shir guddoomiye u noqonaya;

b) Kormeeridda iyo laalinta dhaqangelinta himilooyinka Mashruuca;

t) Dabagalka iyo sugidda xaqiijinta hawlaha Xubnaha Mashruuca;

j) Dersidda iyo oggolaanshaha heshiisyada Mashruucu uu dhinaca ka yahay inta aan la guddoonsan, isagoo kala tashanaya Wasiirka Beeraha;

x) U gudbinta Wasiirka Beeraha iyo Xafiisyada kale ee Dawladda oo ku shaqada leh warbixinno la xiriira hawl qabadka Mashruuca.

Qod. 13aad
(Xilka Maareeyaha Guud)

1. Maareeyaha Guud waxaa lagu magacaabayaa Xeer Madaxweyne, wuxuuna qabanayaa, isagoo dhowraya xuduudda sharciga ah, hawlaha soo socda:

a) In uu fuliyo himilooyinka Mashruuca loo dhisay, go'aannada Guddiga Maamulka iyo tilmaamaha Wasiirku uu soo saaro, isagoo gudanaaya awooddiisa ku tilmaaman Qod. 7aad ee Sharcigan;

b) In uu ku dabagalo mas'uuliyiinta Mashruuca habsami u fulinta xilkooda;

t) In uu si toos ah iyo isagoo u maraya Xafiisyada ka masuulka ah, u hubiyo fulinta qorshaha guud iyo qorshe xilliyeedyada Mashruuca:

j) In uu diyaariyo miisaaniyadda ku talo galka iyo midda xisaabxirka ee Mashruuca, una gudbiyo Guddiga Maamulka;

x) In uu hayo buugagga xisaabaadka Mashruuca;

kh) In uu magaca Mashruuca ku galo heshiisyo;

d) In uu matalo Mashruuca Maxkamadda horteeda.

2. Maareeyaha Guud wuxuu ka masuul noqonayaa, inta u dhexeysa fadhiyada Guddiga Maamulka, shaqooyinka Mashruuca oo dhan oo ay ka mid yihiin shaqaale qorista, soo iibsashada, hawlgelinta qalabka

Mashruuca, iibinta dhirta iyo miraha ka soo baxa bee raha. isagoo raacaya go'aannada Guddiga Maamulka iyo Sharciyada kale ee Dalka.

Qod. 14aad

(Waaxyaha Mashruuca)

1. Mashruucu wuxuu yeelanayaa waaxyo ku saleysan baahida iyo heerka hawlgalkiisa waxaana tiradooda iyo hawlahooda lagu xaddidayaa qaabka Mashruuca iyo Xeer-nidaamiyaha.

2. Waaxyaha waxaa madax u noqonaya Maareeye lagu magacaabo Xeer Madaxweyne, iyadoo la dhegeystay soojeedinta Wasiirka Beeraha.

Qod. 15aad

(Shaqaalaha Mashruuca)

1. Hawlwadeennada Mashruucu waxa ay noqonayaan shaqaale dulsaar ah oo ka tirsan Wasaaradda Beeraha.

2. Inta ay wadaan shaqada Mashruuca waxay mushaar iyo gunno ku yeelanayaan Mashruuca.

3. Mashruucu marka ay jirto baahi, wuxuu qoran karaa shaqaale toos ah, iyadoo la raacayo qaabka sharciga ah ee shaqo qoristta.

4. Shaqaalaha, dhaqangalka Sharcigan ka hor ka tirsanaa Mashruuca, xiriirkooda shaqo sidii ayuu u taagnaanayaa, waxaana lagu dhaqayaa Sharcigan.

Qod. 16aad

(Qaabka Mashruuca)

Qaabka Mashruuca waxaa lagu soo saarayaa Xeer Madaxweyne, iyadoo la dhegesytay soojeedinta Wasiirka Beeraha.

QAYBTA SADDEXAAD

HANTIDADA IYO XISAABAADKA

Qod. 17aad

(Hantida Mashruuca)

Hantida Mashruucu waxa ay ka kooban tahay:

a) Lacagta laga siiyey miisaaniyadda Dawladda Dhexe, maalgelintana loogu talo galay;

b) Deymanka uu u qaato maalgelin ahaan;

t) Deeqaha uu ka helo dalka gudihiisa iyo dibeddiisa;

j) Dakhliga ka soo gala hawlaha Mashruuca;

x) hantida guurtada iyo kuwa maguurtada ah ee Mashruucu uu leeyahay.

Qod. 18aad

(Miisaaniyadda ku talo galka)

1. Sannad-miisaaniyadeedka Mashruucu wuxuu bilaabanayaa 1da Jennaayo, wuxuuna dhammaanayaa 31ka Disember ee Sannad walba.

2. Maareeyaha Guud ee Mashruucu, inta ka horreysa 31ka Oktoobar, wuxuu soo diyaarinayaa miisaaniyadda ku talo galka ee sannadka cusub, wuxuuna hordhigayaa Guddiga Maamulka.

3. Guddiga Maamulku waa in uu go'aan ka gaaraa miisaaniyadda la soo hordhigay inta ka horreysa 15ka Nofember ee sannadka socda, kaddibna loo gudbiyaa Wasiirka Beeraha.

4. Ku dhaqanka miisaaniyadda Mashruuca waxaa ansixinaya Wasiirka Beeraha.

Qod. 19aad

(Miisaaniyadda Xisaabxirka)

1. Maareeyaha Guud ee Mashruucu, inta ka horreysa 31ka Maarso wuxuu isku dubbaridayaa xiritaanka miisaaniyadda ee sannadka la soo dhaafay, wuxuuna u gudbinayaa Guddiga Maamulka isagoo raacinaya warbixin tifaftiran oo la xiriirta kharajka iyo dakhliga.

2. Guddiga Maamulku waa in uu go'aan ka gaaraa xisaabxirka Mashruuca ugu dambeyn 30ka Abriile.

3. Go'aanka Guddiga Maamulka oo Xisaabxirku la socdo waxaa loo gudbinayaa Wasiirka Beeraha si loo ansixiyo.

Qod. 20aad
(Hantidhawraka Mashruuca)

1. Mashruucu wuxuu yeelanayaa Guddi Hantidhawr ah oo ka kooban Guddoomiye iyo laba xubnood.
2. Hantidhowrayaasha waxaa magacaabaya Wasiirka Beeraha.

Qod. 21aad
(Xilalka Hantidhowrka)

1. Hantidhowrayaashu waxay wadajir iyo kelikeliba u baari karaan xisaabaadka Mashruuca, iyagoo oggolaansho ka haysta Guddoomiyahooda.

2. Waxay warbixin ka jeedin karaan Guddiga Maamulka hortiisa.

3. Waxay warbixin raacinayaan xisaabxirka Mashruuca inta aan loo gudbin Guddiga Maamulka.
4. Waxay ka qaybgeli karaan doodaha Guddiga Maamulka, gaar ahaan fadhiyada lagu falanqaynayo miisaaniyadaha Mashruuca. waxayna ka qaadan karaan hadal, hase yeeshee cod ma laha.

QAYBTA AFARAAD
AXKAAM GABAGABO AH
Qod. 22aad

Madaxweynaha JDS. isagoo dhegeystay soojeedinta Wasiirka Beeraha iyo ra'yiga Golaha Wasiirrada, wuxuu soo saarayaa Xeer-nidaamiye faahfaahinaya qaabka hawlgalka Mashruuca, dhammeystirayana Sharcigan.

Qod. 23aad

( Burrin )

Waxaa la burriyey sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 24aad

(Dhaqangal)

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 30 Sep. 1985

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 20. taariikh 30 Sebt. 1985, Isbeddelka 1aad ee Miisaaniyadda 1985.-

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la oggolaaday isbeddelka 1aad ee Miisaaniyadda 1985. sida ku muuqato lifaaqyada A iyo B ee Sharcigan.

Qod. 2aad

Sharcigani horay ayuu ka dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.
Muqdisho, 30 Sep. 1985

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

# L I F A A Q A « A »

## — DAKHLIGA —

| MADAX — XIGE | | TILMAAN | Qiyaasta hore | Is-beddelka | Qiyaasta cusub |
|---|---|---|---|---|---|
| 1.1.1 | Canshuurta keenidda alaabta | | 2.276.000.000 | 300.000.000 | 2.576.000.000 |
| 1.1.2 | » | diridda alaabta | 100.000.000 | 20.000.000 | 120.000.000 |
| 1.1.3 | ' | maam. iyo tirada | 420.000.000 | 180.000.000 | 600.000.000 |
| 1.1.4 | » | diiwaan gelinta | 130.000.000 | 10.000.000 | 140.000.000 |
| 1.1.5 | » | moorka | 200.000.000 | 40.000.000 | 240.000.000 |
| 4.1.1 | Ganaaxa iyo war jinta kale khasabka | | 15.000.000 | 50.000.000 | 65.000.000 |
| 7.1.1 | Dakhliga dibadda | | 1.600.000.000 | 600.000.000 | 2.200.000.000 |
| | | Total | 4.741.000.000 | 1.200.000.000 | 5.941.000.000 |

# L I F A A Q A « B »

## — KHARAJKA —

| ladax | Madax xige | Tilmaan | Qiyaasta hare | Isbeddelka | Qiyaasta cusub |
|---|---|---|---|---|---|
| ·4.0 | 1.2·8 (D) | Kaalmada Kaydka | 150.000.000 | 100.000·000 | 250·000.000 |
| | 1.2.8 (R) | Kharajyada kala duwan | 835.382.743 | 600·000.000 | 1·435·382.743 |
| | 1.3.0 (T) | Korsaarka deynta dibadda | 713.951.280 | 120.000·000 | 833·951.280 |
| | 1·4·1 | Deeqda iyo qaaraanka joogtada ah | 14·700.000 | 50.000.000 | 64·700·000 |
| | 3.2.1 | Bibinta deynta gudaha | 100.000.000 | 50.000·000 | 150·000.000 |
| | 3·2.2 | bixinta deynta d.badda | 937.604.600 | 280·000.000 | 1·217·604.600 |
| | | Total | 2.751.638·623 | 1.200·000·000 | 3.951.638.623 |

MAXKAMADDA DEGMADA/GOBOLKA BERBERA

Guddoomiyaha Maxkamadda Gob/Degmada Berbera

MARKUU ARKAY: Dacwadda hore ku qoran;

MARKUU OGAADEY: Waxa ay ku saabsan tahay Arkayna Baafinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Berbera L. yahay Ibir lana qoray 10.12.84. Wuxuu Ogaadey inay tahay Shaqadiisa:-

MARKUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 8.9.65 n. 2

WUXUU CADDAYNAYAA

Lumidda Jeegagga Wareega Lamb. kala yihiin Jeeg L. 495079 ee la qoray 15.11.84. kuna qoran tahay Lacag dhan 20.000/= Labaatan kun Sh.So. iyo Jeegga L. 495080 lana qoray 15.11.84, kuna qoran tahay Lacag dhan 20,000/= Labaatan kun Sh.So. kuwaasi oo ku qornaa Maxamed Cabdilqaadir Maxamuud iskana lahaa Abokor Cige Xasan.

WUXUU AMRAYAA

In loo sameeyo Jeegagga Wareega ee cusub ninka kor ku magacaaban (30) beri kaddib markii Amarkan lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAKAA LA CODSANAYAA

In Jeegagga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Abokor Cige Xasan ama qof isaga ka sita Wakaalad Sharci ah iyadoo la sugayo (30) soddonka cisho ee kor lagu soo sheegay.

BERBERA, 27.7.1985

Guddoomiyaha Maxkamadda G. Degmada Berbera
(Jaalle Maxamed Axmed Wardheere)

Kaaliyaha Maxkamadda
(Sahal Dayax Weerar)

MAXKAMADDA GOBOLKA J/HOOSE

Guddoomiyaha Maxkamadda G. J/Hoose

MARKUU AKHRIYAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY: In Buugga Kaydka Bangiga ee lumay ee lambarkiisu yahay 5538, laguna soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Kismaayo, kuna qorneyd lacag dhan Sh.So. 2.000/= (Labakun) uu iska leeyahay Jaalle Cabdiraxmaan Cali Maxamed.

HADDUU ARKAY: Qodobka 69aad sharciga lamb. 2 ee 9.9.1965;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buugga Kaydka lamb. 5538 oo ku qoran magaca Cabdiraxmaan Cali Maxamed ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 2.000/= (Labakun).

WUXUU XEERIYEY

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Kismaayo u beddelo Cabdiraxmaan Cali Maxamed, Buugga Kaydka ee Bangiga ee kor ku tilmaaman, una sameeyo mid la mid ah, kaddib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 (Tobaniyoshan) maalmood, maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, haddii inta ka horeysa aan ishortaag laga keenin.

Kismaayo, 10.6.1981

Guddiimiyaha Maxkamadda G. J/Hoose
(Dr. Cumar Yuusuf Faarax)